NOLOSHAADA. DOORASHOOYINKAAGA.

Waxaa halkan ku yaalla saddex fikradood oo qofka ka tirsan bulshada naafada ay tahay inuu ogaado.

AAYO KA TASHIGA

Waxaad tahay khabiirka noloshaada. Aayo ka tashiga micnihiisu waa waxaad xaq u leedahay inaad doorashooyinkaaga samayso, dejisato yoolalkaaga, aadna go'aansato sida aad rabto inaad u noolaato. Ma ahan qofka masuulka kaa ah. Ma ahan daryeelahaaga. Adiga. Dadka naafooyinka qaba waxay sidoo kale leeyihiin xuquuqdan. Meeshana kama baxayso sabab ah in qof kale uu ka walwalay waxa dhici doona.

SHARAFTA KHATAR QAADASHADA

Samaynta doorashooyinkaaga micnaheedu waa mararka qaarkood waxyaabaha ma noqdaan sidi loo qorsheeyay. Taasi ma ahan sabab meesha looga saaro doorashada. Sharafta Khatar Qaadashada waa fikradda in guuldarraysiga, waxyeello soo gaarista, ama khaldidda iyada oo dhan ay dhammaantood qayb ka yihiin ahaanshaha bini'aadan. Waa sida aan u barano. Marka qof uu khatar kasta ka saaro noloshaada si uu u ilaaliyo badbaadadaada, wuxuu sidoo kale qofkaasi meesha ka saarayaa xorriyadaada inaad korto.

WAAJIBAADKA DARYEELKA

Daryeelayaasha, masuuliyiinta, iyo shaqaalaha taageerada waxay masuul ka yihiin ilaalinta dadka ay daryeelaan. Taasi waa waajibaadka daryeelka. Balse ilaalintu kama dhigna koontarool. Yoolku waa in qofka laga caawiyo inuu khatar u qaato si badbaado ah, ma ahan in laga ilaaliyo qaadashada khatarta. Dadka sida dhabta ah u daneeya waxay waydiiyaan: "Sidee ayaan u taageeri karnaa arrintan?" ee ma ahan "Sidee ayaan u joojin karnaa arrintan?

PEB YAM NO UA HAUJLWM UA KE

Aayo ka tashiga ayaa ah xuquuq. Sharafta Khatar Qaadashada ayaa ah waxa xuquuqdaasi ay u egtahay marka lagu dhaqmo. Iyo Waajibaadka Daryeelka, oo loo sameeyo si wanaagsan, ayaa ah waxa suurtageliya.

Waxbadan ka ogow halkan ama booqo
TreatPeopleLikePeople.org